

Sida loo isticmaalo adeegyada tarjumaada



scottish
refugee
council

Abriil 2011

How to use interpreting services - Somali

Tarjumaanadu waa xirfadleyaal ku tabobaran luuqado gaara kuwaasoo xaqiijin karaa wada xidhiidhka adiga iyo hawl wadeenkeenu inuu cadyahay intii suurogal ah.



Tani gaar ahaan waa muhiim marka aad bixinayso faahfaahin ku saabsan sababta aad u gu andoonayso magangalyo-doon. Tarjumaanku wuxuu caawiyaa yaraynta jaah-wareer iyo qalad-fahan. Si adag ayaanu uga soo horjeednaa u isticmaalidda saaxiibada ama qoyska turjumaan ahaan sababtoo ah looma tabobarin xidhiidhiyaal luuqadeed. Sidaas darteed waxa dhici karta inayna lahayn xirfado ay si cad ugu sharxaan waxaad dhahayso, taasoo keeni karta qalad-fahan.

Waxaanu kuu qabanqaabin tarjumaan haddaad u malayso in wada xidhiidhka adiga iyo shaqaalahayaga aan la fahmi karin ama aanu fiicnayn. Haddaad u baahato lahad gaara fadlan noo sheeg waxaanannu isku dayi oonu qababqaabin doonaa in baahidan la daboolo.

Waa inaanu lacag ku waydiin tarjumaanku waana inaad sheegtaa hadday tani dhacdo isla markaaba.

Xuquuqaha iyo waajibaadyada

Tarjumaanka lagu siiyay waa inuu awoodaa inuu hadlo oonu fahmayaa luuqaddaad dooratay. Bixinta tarjumaan ku hadla luuqadda aad dooratay marmarka qaar way adkaan kartaa in la helo; si kastaba, waxaad xaq u leedahay tarjumaan kaasoo:

- Caadil ah – aan isku dayin saamayna ku yeelan waxaad dhahaysid ama qalad-tarjumin
- Aqoon u leh – ilaa inta suurogal ah, eray-eray ku tarjumaan oon bedelin macnaha waxaad u sheegayso
- Xirfadle ah – kuu ixtiraama qof ahaan, ooy ka mid tahay sirahaaga oonu jabin qarsoodiga ama u aanu sheegin macluumaad aad u sheegtay ilo debadda ah.
- Aan midab kale sooce ahayn – aan u dhaqmin qaab midabtakoor ku salaysan waddankaaga, qoomiyadda, rumaysnaanta (diineed ama siyaasadeed), doorashada galmada, da'da ama arrimo caafimaad.

Haddaad jeceshahay, waxaad codsan kartaa tarjumaan lab ama dheddig ah. Waxaanu ku dadaali inaanu fulino codsigaaga; waxaa dhici karta inaanu bixino tarjumaan qof ahaan ama sii marino tilifoon.

Iska-horimaadka danaha

Haddii tarjumaan uu tarjumaan kaaga yahay urur kale oo aad leedahay ama bulshada kaa yaqaan oo uu yahay la taliyahaaga ama saaxiibkaa, markaas tan waa inaad u sheegtaan adiga iyo tarjumaanku hawlwadeenkayaga.

Haddaanad iman Karin ballantaada

Waxaanu nahay urur samofal oo leh maalgalin yar. Haddaad dib uga dhacdo ama ka maqnaato ballantaada oo aanu buuggana galinay tarjumaan, waa inaanu wali lacag bixinaa.

Haddaad sii waddo ka maqnaanshaha ballanta oonad burin, waxa dhici karta inaanu awoodi wayno inaanu ku siino adeeg tarjumaan.

Haddaanad iman Karin ballantaada, naga soo garaac **0800 085 6087** si aad u buriso (tilifoonadu waa bilaash marka laynka, maya marka moobilka).

Sida loo sameeyo cabasho ama soojeedin

Tarjumaanku wuxuu kaa kaalmeeyaa wada xidhiidhka. Tarjumaanadu ma aha la taliyeyaal; waa sharci darro inay bixiyaan talo haajiraad ama magangalyo-doon.

Haddii aanad ku raali ahayn adeegga tarjumaankaagu bixinayo, ama aad jeceshahay inaad samayso soojeedin, waa inaad hore u ogaysiisaa hawlwadeenkayaga ama mid ka mida shaqaalahayga Scottish Refugee Council.

Haddii cabashadaada aan la xallin karin, waxa dhici karta inaad samayso cabasho rasmi ah adoo buuxinaya foomkayaga cabashada oo laga heli karo xafiiskayaga ama websaaydkayaga:

http://www.scottishrefugeecouncil.org.uk/assets/0000/0183/Complaint_leaflet_English_March_2010.pdf

Ama nagala soo xidhiidh websaaydkaya: <http://www.scottishrefugeecouncil.org.uk/contact>

Foomkaaga buuxsan ee cabashada waa in lagu soo celiyaa xafiiskayaga.

Sidoo kale soojeedinahaaga waa la soo dhawaynayaa waxana loo gudbin karaa sanduuqayaga soojeedimaha ee xafiiskayaga ku yaal.

Haddaad dareento inaad heshay talo liidata ama adeeg aan kugu fillayn, sidoo kale waxaad u caban kartaa Xafiiska Wakiilka Haajiraada (OISC): <http://www.oisc.gov.uk/>